

Xadka Shaqada Todobaadka iyo Qalabka Jadwalka Saacadaha Wakhtiga Dheeraadka ah

Xisaabiyaha kalandarkan waxaa loogu talagalay Daryeel bixiyayaasha Qofka (IPs) iyo macamiisha si uu ugu caawiyo saacadaha jadwalka. Isticmaalida qalabkan wuxuu dad ku caawinayaa in laga fogaado sheegasho dheeraad ah (in la shaqeeyo wax ka baddan xadka shaqada todobaadka ee Daryeel bixiyaha Qofka iyo saacadaha bileed ee macamiilka).

Qalabkan waxaa lagu isticmaali karaa Kombuyuutarada Shakhsiyeed, Mac, ama teleefoonada gacanta ee Apple iyo Android-ka ah (teleefoonada casriga ah) iyo tableedyada. Si aad si fudud ugu gashid waxaad ku calaamadayn ama keydin kartaa URL shaashada teleefoonkaaga ama kombuyuutarkaaga shakhsiga ah.

Xusuusin:

- Ha shaqaynin saacado ka baddan kuwa aad ku haysatid xadkaaga shaqada todobaadka adiga oo aan oggolaansho ka haysanin dhinaca Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada
- Ha shaqaynin saacado bilo ka baddan kuwa uu macamiilku u qalmo in uu qaato

Tilmaamaha:

1. **Sannadka / Bisha:** Ka dooro sannadka iyo bisha jadwalkaaga hoos adiga oo ku dhafta khaanada 'Sannadka ama 'Bisha'.
2. **Badhanka tir-tirida:** Haddii aad ku dhufatid badhankan, dhammaan waxyaabaha ku qoran bisha jadwalkaaga, way tirmi doonaan. Haddii saacadaha xadka shaqada todobaadka koowaad kol hore lagu xisaabay tirada guud ee todobaadka koowaad maadaama shaqadaasi gudbayso ama gaarayso bishii hore iyo bisha hadda ah, saacadaha bishii hore ma ahaanayaan kuwo lagu daro xisaabta.
3. **Xadka Shaqada Todobaadka:** Geli xadka shaqada todobaadka looga qoondeeyay Daryeel bixiyayaasha Qofka dhinaca Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada. Haddii aadan garanaynin xadka shaqada todobaadka Daryeel bixiyaha Qofka, la xiriir Maamulaha Kiiska macamiilka.
4. **Magaca Macamiilka 1:** Haddii aad tahay Daryeel bixiye Qof isticmaalaya qalabkan, waxaad gelin kartaa magaca macamiilka aad u shaqaysid khaanadan. Midaan ma ahan mid ay khasab tahay si uu qalabka u shaqeeyo.
5. **Magaca Macamiilka 2:** Haddii aad tahay Daryeel bixiye Qofeed isticmaalaya qalabkan oona u shaqaysid labbo macamiil, waa in aad gelisid magaca khaanada 'Magaca Macamiilka 2' si aad u furtid oona u gelisid saacadaha aad u shaqaysay macamiilka labbaad.
6. Geli tirada saacadaha (ay ku jirto saacadaha afar meeloodka ah tusaale ahaan, geli 3.25 ee 3 saacadood ah iyo 15 daqiiqo) qorshooyinka Daryeel bixiyaha Qofka uu ku shaqeeyo maalin kasta ee ku qoran khaanada labbaad (hoosta Magaca Macamiilka 1 ama 2-aad) ee bil kasta.
7. Qalabka wuxuu xisaabi doonaa kuwaan soo socda:
 - a. Tirada guud ee saacadaha shaqada todobaadka waxay ku qoranyihiin khaanada labbaad ee safka **cagaarka ah** midkaas oo ku yaala kadib todobaad shaqo kasta (todobaadka shaqada = Axad 12:00 am-Sabti 11:59 pm habbeenkii)
 - b. Tirada guud ee saacadaha dheeraadka ah ee loogu talagalay todobaadka shaqada waxay ku qoranyihiin khaanada seddexaad ee safka **cagaarka ah** midkaas oo ku yaala kadib todobaad shaqo kasta (todobaadka shaqada = Axad 12:00 am-Sabti 11:59pm)
 - c. Tirada guud ee saacadaha la shaqeeyay bisha – Midaan waxay ku qorantahay khaanada **jaalaha ah** ee ku taala dusha sare ee bidixda ah. Lambarkan waa in uusan noqonin mid ka baddan saacadaha bileed ee macamiilka ama lacag bixinta la oggolaaday bisha ee Daryeel bixiyaha Qofka.
 - d. Tirada guud ee saacadaha wakhtiga dheeraadka ah ee la shaqeeyay ee loogu talagalay bisha- Midaan waxay ku qorantahay khaanada **jaalaha ah** ee ku taala bartamaha.
 - e. Tirada guud ee saacadaha wakhtiga dheeraadka ah **ka baddan xadka** ee loogu talagalay bisha – Midaan waxay ku qorantahay khaanada **jaalaha ah** ee ku qoran dusha sare ee midigta ah, wuxuuna noqonayaa **GUDUUD** marka saacado wakhti baddan oo dheeraad ahi lagu daro.
***Saacadaha lagu qoro waxa ka baddan xadka shaqada todobaadka Daryeel bixiyaha Qofka** waxaa loo xisaabi doonaa ayada oo la isticmaalayo xisaabta saacadaha wakhtiga dheeraadka ah. Haddii ay jiraan wax saacado ah oo lagu qoray gudaha **GUDUUDKA**, Daryeel bixiyaha Qofka wuxuu shaqeeyay wax **KA BADDAN** xadkooda shaqada todobaadka. Waxaad u baahnaan doontaa in aad isbedelo ku samaysid aalada wax lagu xisaabo ee kalandarka, iyo jadwalkaaga, si aad midaan u saxdid.

Wixii ku saabsan macluumaad khuseysa siyaasada Saacadaha wakhtiga dheeraadka ah ee Daryeel bixiyaha Qofka fiiri [Wargada xaqiiqda Saacadaha wakhtiga dheeraadka ah ee Daryeel bixiyaha Qofka](#).

Wixii ku saabsan xogag kale oo dheeraad ah oo xiriir la leh Saacadaha wakhtiga dheeraadka ah ee Daryeel bixiyaha Qofka booqo boggaan internetka ah www.dshs.wa.gov/altsa/IPOT.